



Halkee daryeel-caafimaadeed kala xiriiri karaa?

Warbixin loogu talagalay magangeliyo-dooneyaasha iyo dadka aan dalka
Iswiidan sharci ku haysan.

Var ska jag söka vård?

Information för asylsökande och personer som är i Sverige utan tillstånd.




Haddii aad daryeel-caafimaadeed u baahan tahay oona aadan garanayn halka aad kala xiriiri lahayd ama ku hadli karin af-iswiidish, waxaad khadka taleefanka kula xiriiri kartaa, Waddo-tuseyaasha xarumaha caafimaadka +46 650 925 35. Waddo-tuseyaasha xarumaha caafimaadka waxay ka kooban yihiin kalkaaliyayaasha caafimaadka waxayna ku hadlaan af-ingriisi. Waxay ka caawini doonaan sidii aad ula xiriiri lahay xarumaha daryeel-caafimaadeedka oo aad kaddib ballan u qabsan lahayd. U sheeg inaad qof turjubaan ah u baahan tahay.

Behöver du vård och inte vet vart du ska vända dig, eller om du inte kan prata svenska, kan du ringa vårdvägvisarna på telefon +46 650 925 35. Vårdvägvisarna är sjuksköterskor som kan prata engelska. De hjälper dig att kontakta en hälsocentral för att boka en tid. Berätta om du behöver en tolk.




Barta internetka 1177.se waxaad ka aqrisan kartaa warbixin ku saabsan caafimaadka iyo daryeelka bukaha kuwaasoo luqado kala duwan ku qoran. Sidoo kale waxaad halkaas ka heli kartaa adreeska goobta daryeel-caafimaadeedka ama rugta daryeel-caafimaadeedka degdegga ee kugu dhow.

På webbplatsen 1177.se kan du få information om hälsa och sjukvård på olika språk. Du kan också hitta var din närmaste vårdcentral eller akutmottagning ligger.



Waxaad wici kartaa 1177. Kaddib qof kalkaalisada caafimaadka ayaa la hadli kartaa. Waxaad wici kartaa maalin kasta iyo saacad kasta.

Du kan också ringa telefonnummer 1177. Då får du prata med en sjuksköterska. Du kan ringa alla dagar, dygnet runt.



Kalkaalisada caafimaadka waxaad ka heli doontaa talo iyo caawinaad xiriir la leh sida aad u daryeeli karto cudurka kugu dhacay ama dhaawaca markii aad gurigaaga ku sugan tahay. Kahor inta wadahaadalka la soo gabagabayn kalkaalisada caafimaadka waxay ku wargelin doontaa haddii aad u baahan tahay inaad xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo in kale, iyo halka aad kala xiriiri karto iyo goorta.

Sjuksköterskan ger dig råd och hjälp med hur du kan ta hand om sjukdomen eller skadan hemma. Innan samtalet avslutas informerar sjuksköterskan dig om du behöver söka vård, vart du ska vända dig och när.



Dhaawacyada iyo cudurrada badidooda dartood waa inaad xarumaha daryeel-caafimaadeedka ka la xiriirto. Xarumaha daryeel-caafimaadeedka waxay tusaale ka caawini karaan haddii muddo dheer aad qandho la dhibanayd, la dhiban tahay aleerjiyo ama aad doonayso inaad sigaar-cabbida joojiso.

Du ska gå till en vårdcentral för de flesta skador och sjukdomar. Vårdcentralen kan till exempel hjälpa dig om du har haft feber länge, har allergi eller vill sluta röka.



Xarumaha daryeel-caafimaadeedka waxay kalo ka caawini karaan haddii aad la dhiban tahay dhibaato xiriir la leh caafimaadka nafsiga. Taageero iyo qof aad la hadasho ayaa heli kartaa.

Vårdcentralen kan också hjälpa dig om du har psykiska problem. Du kan få stöd och någon att prata med.



Haddii aad u baahan tahay daryeel-caafimaadeedka gaar ah, waxaa ku gudbin doonto rugta daryeel-caafimaadeedk. Xaaladdaas rugta daryeel-caafimaadeedka waxay la xiriiraysa xarun kale, taasoo loo yaqaanno [remiss].

Vårdcentralen hjälper dig vidare om du behöver mer specialiserad sjukvård. Då kontaktar vårdcentralen en annan mottagning. Detta kallas remiss.




Xarumaha daryeel-caafimaadeedka badidooda waxay furan yihiin isniin-jimce, subaxdii ilaa galinka dambe. Saacadaha hore iyo kuwa dambe ee habeenkii iyo maalin fasax waxaa la booqan karaa xarumaha heegganka. Kaddib waxaa ka heleysaa daryeel-caafimaadeedka oo aan dib loo dhigi karin, sida maalinta ku xigta.

Vårdcentraler är ofta öppna på vardagar från morgon till eftermiddag. På kvällar, nätter och helger kan du gå till en öppen jourcentral eller jourmottagning. Där får du hjälp om du har ett problem som inte kan vänta tills nästa dag.



Cudurrada iyo dhaawacyada u baahan in si degdeg ah wax looga qabto dartood, waa inaad booqato waaxda daryeel-caafimaadeedka degdegga ee isbitaalka. Tusaaleha xaaladaha in si degdeg ah wax looga qabto waxay noqon karaan xannuun keddiss oo feeraha laga dareemo, curyaamid, lafjab iyo nabarro waawayn.

Vid akuta sjukdomar eller skador ska du åka till en akutmottagning på ett sjukhus. Exempel på akuta tillstånd är akut smärta i bröstet, förlamning, benbrott och stora sår.



Waxaad kaloo la xiriiri kartaa xarumaha lagu daryeelo caafimaadka degdegga ee nafsiga. Xarumaha rugta daryeel-caafimaadeedka degdegga ha booqan haddii dhibaatooyinkaaga ay fudud yihiin. Xaaladdaas la xiriir rugta daryeel-caafimaadeedka ee aad ka tirsan tahay.

Du kan också vända dig till en akutmottagning vid akuta psykiatriska tillstånd. Åk inte till akutmottagningen med lättare problem. Då ska du kontakta en vårdcentral för att få hjälp.



Haddii ay jirto xaalad u baahan in si degdeg ah wax looga qabto, sida halis ku jirto noolasha qof, waa inaad wacdo 112. Haddii loo baahdo qof turjubaan ayaa khadka taleefanka kugu tujumi doono.

Ring 112 vid en akut situation och om någons liv är i fara. Du kan få hjälp av en tolk via telefon om det behövs.



Daryeelka caafimaadka/bukaanka iyo dawooyinka ruqsadda dhakhtarka lagu qaato waa lacag la'aan ilmaha iyo dadka aan weli 20 sano buuxsan. Halka kuwa ka waawayn waa in ay lacag bixiyaan.

Hälso- och sjukvård och medicin på recept är gratis för barn till och med 20 år. För personer över 20 år kostar det pengar.



Warbixin dheeraad oo ku saabsan adeegyada caafimaadka ee Gobolka Gävleborg ka aqriso **1177.se/Gavleborg/vard-i-gavleborg**



Läs mer om vård i Gävleborg på **1177.se/Gavleborg/vard-i-gavleborg**